



Shahaadada dugsiga Sare (HSC) heerka ugu hooseeya ee codsiga kulanka waalidka

Name of student
Magaca ardeyga

Name of parent
Magaca waalidka

Date for meeting
Taariikhda kulanka

Gacaliye waalid/xannaaneeye

Waxaan warqadaan kuugu soo qorayaa inaan ku xasuusiyo wax ku saabsan heerka ugu yar ee HSC. Ardeydu si ay u helaan shahaado waa inay gaaraan heerka ugu hooseeya ee wax qorista iyo akhriska iyo xisaabta. Heerka ugu hooseeyaa waxaa go'aamiya imtixaanada internetka ah ee akhriska, qoraalka iyo xisaabta.

Ilaa wakhtigaan ilmahaagu ma gaarin heerka ugu hooseeya ee HSC saadaraadeed wuxuu khatar ugu jiraa inuusan helin shahaadada HSC.

Ilmahaagu ma fulin heerka:

Reading
Akhriska

Numeracy
Xisaabta

Writing
Qoraalka

Waxaan jecelahay inaan siiyo ilmahaaga fursad kasta oo uu ku gaarayo heerka ugu yar ee HSC iyo adiga fursad kasta oo aad ku taageerayso si ay u gaaraan.

Waxaan jeclaan lahaa inaan kugu martiqaado kulan wadahal oo ah taariikhda kor ku xusan si aad adiga, ilmahaaga iyo dugsigu aad si iskaashi leh uga wada hadashaan qorshaha waxbarasho ee ilmahaaga. Wadahadalka waxaa ku jiri doona waxa uu oonayo inuu ilmahaagu ka yeelo HSC, wax qorista, akhriska iyo xisaabta taageerada la helayo iyo fursadaha dugsiga ka dib. Ku lug yeelashadaadu aad ayey muhiim u tahay.

Natiijada imtixaanka heerka ugu hooseeya ee HSC waxaa laga helayaa xisaabta ilmahaaga ee [Student Online](#) ee website ka (NESA) Hay'ada Heerarka Waxbarasho ee NSW. Waxaan keeni doonaa nuqul kulanka.

Haddii aad jeclaan lahayd turjumaan inuu kulankan yimaado, fadlan la xiriir dugsiga oo mid kuu balamin doono haddii la helayo.

Adeega Turjumaada Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya si aad ula xiriirto dugsiga, fadlan ka wac Adeega Turjumaanka Taleefanka 13 14 50 oo weydiiso turjumaan luuqadaada ah. Xiriiriyaha ayaa wici doona dugsiga oo Khadka soo gelin doona turjumaan wada hadalka kaa caawiya. Adeegan wax lacag ah lagaama qaadi doono.

Mahadsanid

Maamulaha (Principal)

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qorshaha heerka ugu yar ee HSC waxaa laga heli karaa website ka NESA <https://educationstandards.nsw.edu.au/wps/portal/nesa/11-12/hsc/hsc-minimum-standard>